



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku dhawaaqida maamulaha cusub ee Roosevelt, KD Parman

Abriil 2019

Bulshada Roosevelt ee Qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in KD Parman ay aqbashay dalabkayagii ahaa in ay maamulaha soo socda ka noqoto Dugsiga Sare ee Roosevelt.

KD waxay Roosevelt uga timiday Dugsiga Sare ee Grant, halkaasi oo ay ka soo noqotay Maamule Ku xigeen tan iyo 2015-kii. Waqtideedii ay doorkaasi haysay, KD waxay keentay dadaallo badan iyo shaqooyin muhiim ah, oo ay ka mid yihiin xirfadaha waxbarasho, dib u helidda credit-ka, Waxbarashada Gaarka ah iyo isku toosinta manhajka dugsiga. Waxay u soo shaqaysay dugsiyada PPS tan iyo 2002-kii, iyada oo xirfadeeda shaqo ee halkan ku bilowday macallin ay ka soo ahayd Dugsiga Dhexe ee George.

Tani waxay nooc ku soo guryo noqosho oo kale u noqon doontaa KD, iyada oo ardayda wax ku soo bartay RHS sanadihii 2001, ka dib wax soo dhigtay Dugsiga Dhexe ee George ka hor intii aysan ku soo noqon RHS sanadihii 2013-15 Roosevelt iyada oo soo noqotay macallimad, tababare tacliimeed iyo maamulaha ardayda. Waxay jeceshahay dugsiga iyo bulshada dugsiga waxayna aad ugu faraxsan tahay in ay soo laabato iyada oo maamule ah.



KD Parman

KD waa hoggaamiye dhanka fikirka ku caan ah ee meelaha ay ka midka yihiin dib u habeynta dugsiyada iyo horumarinta xirfadeed, iyada oo shaqadeedu u horseeday degaanka iyo qarankaba in lacago deeq ah bixiyaan kuwaasi oo loogu talagalay qorshayaasha ay ka midka yihiin sayniska iyo tiknoolajiyada, iyo maamulka deegaanka. Waxaan ku kalsoonahay in dareenka weyn ee KD u qabto waxbarashada loogu talagalay dadka aan taariikh ahaan aan sida fiican adeega u helin, waayo-aragnimada ay leedahay macallimad iyo maamule ahaan iyo meelaha kala duwan ee daneynayso iyo khibrada ay leedahay, ay noqon doonto mid faa'iido weyn leh marka ay kaalinta hoggaamineed ka bilowdo Roosevelt.

KD waxay iyo Shahaadeede Jaamacadeed ee Sayniska ka qaadatay Kulliyadda William Smith, iyada shahaadooyinkeeda MEd iyo EdD ka qaadatay Jaamacadda Gobolka Portland.

Ku dhawaaqidani waxay astaan u tahay bilowga bog cusub ee ay leeyihiin KD Parman iyo Roosevelt, iyada oo sidoo kale ah gebagabadii nidaamkayagii aan ku raadinaynay qofka ku habboon booskan aadka u muhiimka ah. Kuwo badan oo idinka ka mid ahaa oo ku hawlanaa hawsha oo ka tirsanaa bulshada Roosevelt ayaa nagu soo biiray kulamadeenii bulshada isla markaana la socodsiiyay anaga iyo musharaxiinteenaba waxa muhiimada u leh, ardayda iyo qoysaska aan u adeegno. Waxaanu si qoto dheer u mahadineyna waqtiga ay siiyeen ardayda, bulshada iyo shaqaalaha taageeray xulashadan.

Waan ogahay in aad si toos ah war uga maqli doontaan KD maalmaha soo socda. Ilaa taasi la gaarayo, fadlan igula soo biira in aanu iyada ku soo dhawayno Dugsiga Sare ee Roosevelt iyada oo ah maamulaha cusub ee dugsiga.

Si Daacadnimo leh,
Joe LaFontaine

Ku xigeenka Kormeeraha Guud ee Goobta

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.